# Golaha Wakiilada JSl

**Waaxda Hadal Qoraalka**

## *Minuteska*

## Dooda Xeerka Baanka Dhexe

**10/03/2012**

1. **Md. Cali Maxamed Aadan:-** Mudane Gudoomiye markaan xeerkan akhriyay, shareecada islaamka wax ka hor imanayaa kuma jiraan wuxuu aad u cadeeyay shaqadii baanka dhexe oo waafaqsan shareecada islaamka iyo dastuurka.

   ***Sidaa dareteed waxaan soo jeedinayaa:-***

   - In xeerkan Baanka dhexe sidiisa lagu ansixiyo, wa-bilaahi tawfiiq.

2. **Ibraahim Axmed Raygal:-** shi-rgudoonka iyo mudanayaashu waad salaaman tihiin, anigu hal qodob baan doonayaa inaan ka hadlo, marka hore waan taageersanahay soo jeedinta Mudanihii iga horeeyay isaga Xeerka Nabadgalyada wadooyinka oo isna diyaar ah oo aad loogu baahan yahay, Qodobka Xeerka ee aan u kacayna waa **Qodobka 3aad Xafarkiisa 3aad**oo u qoran '**Baanku wuxuu yeelanayaa Dhamaan hantidii awal hoos iman jirtey baankii dhexe ee somaliya sida baanka ganacsiga, keydka iyo baanka horumarinta IWM**' waa run waana sax oo baanku aqaladuu ku jiro ama miisaskii meesha loogu yimi waa run oo dee baanka somaliya ahaan jirey baa somalilandd banka isu badalay, laakiin hadii barito lagu xisaabtamo oo laba dal lakala noqdo waxa laguu soo qaadanayaa assetkii la haystey oo labaduba maxay haysteen,

   Markaa halkan markaan ku sii qorno baanankii oo dhan waan dhaxalnay, waxna aan la hayn, halkaa in la yar cadeeya ayaa loo baahan yahay oo dib ugu yara noqono ee meesha ugu qoranay waan dhaxlaynaa inaan iska hubsano.

   ***Waxaan taageersanahay Soo jeedintii Mp iga horeeyay:-***

   - In Xeerka sidiisa lagu ansixiyo

3. **Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** Gudoomiye horta waxba maan soo diyaarin oo buugii waan ka imi, waxaan anigu ku talin lahaa waxaan aad ugu fiirsaday erey bixinta, oo waxaan is idhi si aan u kaalmeyno ereyada ku haboon waxaa fiicnayd in helo ereyadii ingriiska ahaa ee turjumida laga sameeyay, waxaad moodaa iminka inaanay aad iyo aad waafi u ahayn kalimaad la abuuray oo aan qurux badnayn baan ku arkey, sidiisa kale xeerku waa xeer aad u fiican, dawlada badan oo baanan lehina waa ina sugayaan.

   ***Waxaan ku dhaafayaa:-***

   - Deg-deg aan isaga gudbino Xeerka waad mahadsan tihiin.

4. **Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne:-**isuma taagin inaan dood ka bixiyo xeerka, laakiin waxaa ii muuqata Qodob aad iyo aad muhiim u ah, waxa weeye waa xeerkii bangiga dhexe ee somaliya waa xeer qiimo weyn ugu fadhiya, xaq wuxuu u leeyahay in ragii aqoonta u lahaa ama baankan ha noqdee inay joogaan halkan iimana muuqdaan, ragan kale ma lihi waxba garan maayaan, laakiin waxa weeye nimanka khibrada u leh oo inooga xog-gaalsan weeye xeerka.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Xeerkan in helo ragiisii oo ra'yi iyo aqoon ku kordhiyaan waana mahadsantahay Gudoomiye.

5. **Md. C/raxmaan Cismaan Caalin:-** Gudoomiye inkastoo aan dhameystirin eegista Xeerkan, waxaan la qabaa mudanayaashii iga horeeyay in erey bixinta dib loogu noqdo iyadoo laga calaamadinayo qoraalada ay ku dhex jiraan, marka horena waa in la helo ereyadii ingiriiska ahaa ee laga soo turjumey si loo saxo, waayo waxaad modaa inay aad isugu dhexdaad sanyihiin, **Qodobka 3aad** ee Xeerka qaabka uu qoran yaha ciwaankiisu oo ah "**Sii jiritaanka iyo meeqaamka sharci ee Baanka"** Xeerka magaca ayaa laga badaley tiri-tirid lama sameynin, markaa maadaama ay tahay amendment in la sameeyay, waa dib u eegis oo waxaa ku jiri kara magaciisa, markaa natureka magaca waxay ka badali kartaa ma jirto, marka waxaan odhan lahaa cinwaankaa ha laga dhigo "***sharciyada jiritaanka Bangiga"*** oo laga badalo meeqaamka iyo sii jiritaanka isku daba qoran.

Waxaan iyana is dultaagey Isla **Qodobka 3aad farqadihiisa 7aad iyo 8aad**, hadaan ku horeeyo **F/7aad** waxay qoreysaa **"Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ku dhaqmayaa axkaamta shareecada Islaamka ee maaliyadeed, maamul iyo hawl galineed isagoo tix galinaya curfiga haayadaha maaliyadeed ee caalamiga ah.** Waxa weeye labadaasi isma galaan, waa in laga saaraa Curfiga hay'adaha Maaliyadeed oo toos loo qaataa taa shareecada islaamka, waayo labaduba isma wada gali karaan, Markaa waxaan odhan lahaa " ***f/7aad iyo 8aad dib ha loogu noqdo oo ha la saxo oo ama shareecada islaamka toos ha loo qaato, laakiin ma wada galikaraan heshiiyada caalamiga ah iyo shareecada islaamku, oo waa mid la qaataa"***

horena waxaan halkan uga xusey marka laga tago macaamilkeena iyo Serviceskeena, waxa weeye hay'adaha Caalamiga ah ee aynu la dhaqmeyno maxaynu ugu talagaleynaa, oo IMF iyo world banka la dhaqmeyno maxaynu ugu talagaleynaa hadaynu meesha ka saarno interstkii meesha, waayo haday wax ku siinayaan iyagu interst bay doonayaan, shuruucdeenana kuma taalo inaynu interst bixinaa markaa waa in Xeerka lagu cadeeyaa waxaynu ugu tala-galeyno.

**Qodobka 5aad** oo mid farsamo, markaad akhrido **F/1aad** oo ah marka uu gudan waayo baanka dhexe ee Somaliland awoodo madax banaan oo uu wax ku maamulo oo ay ku jirto inuu soo saaro shuruucdii lagu fureyo dhaq-dhaqaaqyada nidaamka maaliyadeed ee "**Korontada"** kalmadaa waxaa loo badaley af Somali electronic transactions, marka

kalmada kontoro la yidhaahdo micne kale ayay yeelanaysaa oo waa leydh, markaa waxaan leeyahay kalmada afsomaligeeda ha la doono oo halu badalo oo ha ladoono tii ku habooneyd.

**F/6aad** waxaan odhan **"lahaa kalmada fir-fircooni ha laga saaro oo completely ha laga reebo siyaasada galaan"** waayo**,** waxa ay u ogolaaneysaa inay si hoose ugu tirsanaan karaan, labada Qodob 8aad iyo 9aad ee dhismaha xubnaha baanka dhexe way isku soo noq-noqonayaan oo qodobo ku jira Qodobka 8aad ayaa ku jira kan 9aad, markaa labadaa qodob ha laga dhigo mid kaliya, oo ha la yiraahdo "**Hawlaha iyo Awoodaha agaasimaha bangiga dhexe"**tan kale waa in la kala saaraa qaab dhismeedka bangiga dhexe oo waxaa la siiyay Gudoomiye, Ku-xigeen, Agaasime iyo Xubno, Gudida Board waxaa gudoominaya oo Gudoomiye iyo Ku-xigeen u ah Gudimihii, ku xigeenkii iyo Agaasimihii, waana inay boardka iyo Executiveku kala madax banaan yihiin, sidan maxay boardku maxay qabanayaan, markaa waa in la kala saaro Boardka iyo executiveku.

Qodobka 11[aad] iyo 13[aad], oo kala ah, Q/11aad oo ah Xubinimada Shuruudaha Gudidda **Agaasimayaasha**iyo**Q/13[aad], u qalmid la'aanta iyo ka saarista xubnaha guddida agaasimayaasha,**waxaan odhan lahaa shuruudaha looga baahan yahay waa inaan laka saarin, oo waa in la isu wareejiyaa.**Qodobka 12[aad]f/1[aad] iyo 2[aad]**labada waxaa odhan lahaa ha loo qaabeeyo oo laga badalo sidey u yaalaan, oo ha la yidhaahdo wixii gunooyin ah ama Mushahar ah waxay wereegto ku soo saaraya Madaxweynaha waayo madaxweynaha Mushahar loo qorimaayo, waana xeer lagu cadeeyaa oo lagu nidaamiyaa.

Hadaan eegno **Qodobka 13aad f/1aad xarafka "J"**waan fahmi waayay oo waxaa ku taaley masaluftey, waa qof kacay oo maxkamadi cadeysay inaan iska bixin kareyn deynta lagu leeyahay , yaa ku leh ma bangiga mise shirkad kale, waa in la cadeeyaa cida deynta ku leh. Xarafka "Q" hadii uu sabab la'aan ka maqnaado laba ama in kabadan ee fadhiyada waa sababaha lagu waayo karo xubinimada, waxa ku taala mudo sanad ah haduu laba fadhi ka maqnaado waa laga saari karaa, anigu waxaan odhan lahaa halaga dhigo "**sanad gudihii 10 kal-fadhii haduu ka maqnaado"** waayo laba fadhi aad bay u yaryihiin,

Waxaan kaloo isdultaagayaa, Xarafka "s" waxaa ku taala "intuu uu ka mid ahaa Gudida agaasimayaasha inuu haduu ku xadgubay sharciga ama waajibaadka ama uu galey hawlo siyaasadeed ama uu sameeyay anshax xumo taasoo wax yeeleysaa hawlaha bangiga waa afar waxyaabood, markaad mid taabato waad ka saareysaa inta kale meesha, waxaana odhan lahaa mid walba gaarkeeda ha loo xuso, markaa waxay u baahan tahay in la isku saxo oo mid mid loo sheego.

**Qodobka 13aad F/2aad,** maxay soo kordhinaysaa farqadaasi iyo **F/3aad,** anigu labadaa micnaha ay meesha ugu jiraan waan fahmi waayay, waxaan jecelahay in la cadeeyo.**Qodobka 14aad, F/1aad,** intaas waxaan odhan lahaa ha lasoo kobo oo wixii ka danbeeya kalmada **ama** ha laga saaro, **F/4aad**, waaxaan odhan lahaa 3 cisho halagu soo koobo wey ku filan tahay, 10 cisho markaa looma baahna.

**Qodobka 17aad** ee doodaha **qoraal shireedyada** iyo go'aamada, Markaa Qoraal shireedyada halaga dhigo ***Hadal-qoraalada,*** **F/3aad**, dhamaan ama qeyb ahaan halkaa halug saxo, **Qodobka 18aad F/1aad**waxaan sileeyahay constitutional rightkii way ka baxsantahay, qofka waa lala xisbaabtami karaa oo la ogaan karaa hantidiisa, laakiin qofka reerkiisa maxaa hantida looga ogaanayaa, isaguun baa cadeyn kara maadaama uu masuuliyadaa qaadayo, mana ah markan ee marka la soo dooranayo ama la magacaabayo, markaa waxaan odhan ***lahaa Faraqadaa halaga saaro.***

**F/4aad**, waa lagu daraa shuruudaha shaqo waayista xaga sare ku xusan, waana inay cadyihiin waxa loola jeedo.**Qodobada 19aad iyo 20aad,** waxaa ku qoran Gudoomiyaha, Ku-xigeenada iyo agaasimyaha guud ee bangiga dhexe, ***markaa labada Qodob ee 19aad iyo 20aad waxyaabaha ay ka hadlayaan waa isku mid, markaa waa in la isufo oo Qodob laga wada dhigo, si aanay Contradiction isugu sameyn.*** **Qodobka20aad** waxaa ku taala gudoomiyuhu waa inuu yeeshaa awoodaha aanay gaar u lahayn Gudida agaasimayaashu, iyadoo aanay ka baxsanayn awooda u baahanyahay dhamaan talaabooyinka uu ku wadi karo hawsha baanka.

6. **Dr. Cali yuusuf:-**Gudoomiye anigu waxaan ka hadlayaa Qodobka Sariflayaasha oo kaliya, oo ah Qodobada 74aad iyo 75aad ee sariflayaasha lacagta qalaad ee F/3aad markaad "B" ma cada waxa loola jeedo, Xadiga ugu yar ee ay goysay shuruucda bangiga dhexe ee Somaliland, kolkaa Xadigaa ugu yar, ma intuu Sarifayaa loola jeedaa, mise qiimo bangigu gooyay? Siduu u jeedo aniga iima cada.

   laakiin ra'yi ahaan waxay aniga ila tahay madaama suuqa xorta ah aynu dooranay oo ganacsigeenii xoryahay, sarifka lacagaha qalaad waxaa xukumaya suuqa wxuuna ku saleysan yahay kolba baahida dalabka iyo cardi (Demand and Supply), hadii dollarku uu fara bato oo wax dhoofintu badato xoolo badan aynu dhoofino wuu jabayaa, hadaynu wax soo dhoofasano dollarkii ina soo galayey xawaalada ha lagu soo diro ama ha noqdo xoolo aynu dhoofinee markaa dollarku qaali ayuu noqonayaa.

   Waxaa kale oo saameyn ku yeelanaysa hadii dawladu ay xakameyso lacagteeda oo sida lagu bixinayaa ay noqoto si adag, kolkaasi lacagteenu qaali bay noqonaysaa ama marka dollarka la eego, laakiin hadii lacagta dawlada ka soo baxaysaa ay badato ama kharashka dawladu bato, kolkaa dollarkii qaali ayuu noqonayaa, tan kale oo cadeyn u baahan waxa weeye,

Xarafka "T" ee isla farqadaa oo ah, "**Ururinta iyo qabyo-tirka (maintain) xogta ku saabsan macaamiishooda"**macaamiisha waxaa loola jeedaa sariflayaasha, taasina inkastoo aaney cadeyn hadana sidey u qoran tahay hadaan u qaato, Xog waxaa laga rabaa sariflayaasha inay keenaan, markaa sariflayaasha Hargeysa oo kaliya hadaan eegno waa boqolaal qof, hadii loola jeedo dadka wax ka sariftey mid waliba wuxuu ka sariftey waxay noqoneysaa dhib badan noqoneysaa qiimo weyn inay sameynaysona u malayn maayo.

Qodobka muhiimka ah ee in laga hadlo oo Mudayaashu hoos u eegaan la rabo waa Qodobka 75aad F/3aad oo cashuurta laga laga rabo sariflayaasha. Sidaad la socotaan sariflayaasha waxaa ku jira dad fara badan oo danyar ah oo raasamaalkoodu ahayn wax ka badan dhowr boqol, halkan afar qeybood baa laga dhigey qiimaha sariflayaasha laga rabo ruqsad ahaa, kuwa ugu horeya waxaa ku qoran waxay bixinayaan lacag dhan **(Sarifka darajada 1aad 30,000,000),** oo bangiga siinayaan license-kaasi oo u dhiganta qiyaastii $**5000oo dollar,** horta ma soo gashaa sanadkoo dhan, waxaa soo qorey qofaan suuqaba wax wara kahayn, waxayna keenaysaa inaanay sariflayaashaashi jirin, tan kale meherada ganacsiga ee suuqa wax license u dhow $5000 maan arag.

Markaa taasi waa in dib loogu noqdaa oo waxay qaadi karaan oo darajada 1aad aanay ka badneyn dhowr boqol oo dollar, tan kale ganacsade weeyaan markaa liisankaasi waxaa ku haboon in dawlada hoose bixiso dadka sarifka ka ganacsanaya.

***Sidaa darted waxaan soo jeedin lahaa hadaad igu raacdaan"-***

- In Qodobadaa Qiimaha dadka aad looga dhigo oo waxay qaadi karaan laga dhigo.

7. **Md. Baar Siciid Faarax:-** Gudoomiye Xeerka Baanka dhexe anigu waanba ka imi saaka, laakiin, markaa eeg-eegay ee aan dadka iiga aqoonta badan aan eegay ama ra'yi ahaan siday ila tahay eegay xeerkan oo dalka aad loogaga baahan yahay qoladii diintuna sheegtay in wax diinta ka hor imanaya oo ku jiraa aanay jirin.

***Waxaan soo jeedinayaa:***

- Xeerkaa in la ansixiyo oo la sii daayo.

8. **Md. Cumar Axmed Saleeban:-** Gudoomiye Xeerkan Baanku akhriskii 3aad buu ku jiraa, waana laga hadlay oo laga doodey, dadkii ay khuseysay ee Baanka iyo Maaliyada oo kale way soo up dategareeyeen, diinta islaamka wax ka hor-imanaya oo ku jiraana ma jiraan.

***Markaa waxaan odhan lahaa:-***

- Xeerkani sidiisa ha lagu ansixiyo oo hala sii daayo.

9. **Md. Faarax:-**Gudoomiye horaa looga doodey Xeerka markaa waxaan soo jeedinayaa in duuduub loogu codeeyo oo la ansixiyo.

10. **Md. Maxamd X. Xuseen Ciise:-** shir-gudoonka iyo mudayaasha maka hore waan idin salaamayaa, salaam ka bacdi, waxaa lagu guda jiraa dooda Xeerka Baanka dhexe, anigu in badan akhriyin, laakiin waxaan ku dari lahaa, Xeerkan Qodobkiisa 2aad wuxuu cadeynayaa in shareecada islaamku u tahay sal xeerkan baanka dhexe, markey sidaa tahay, Xeerku wuxuu reebayaa in baanka dhexe qaato wax shareecada islaamka ka soo horjeeda, laakiin xeerku ma cadeynayo in nidaamka maaliyadeed Somaliland ku dhaqmi doonta kan caalamiga ah baa mise islaami, xeerku wuu ka aamusey, markaa waxaan odhan lahaa Xeerka gudihiisa ha lagu cadeeyo, baanka Somaliland wuxuu noqonayaa mid islaamiya, wixii ka hor-imanayna lama ogola.
    - **Intaas uun in lagu cadeeyo ayaan soo jeedinayaa anigu waad mahadsantihiin.**

11. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-**waxaan soo jeedinayaa in duuduub lagu ansixiyo xeerka.

12. **Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** shir-gudoonka, mudanayaash iyo saxaafaduba waan salaamayaa, horta xeerkani mudo dheer buu golaha yaaley ilaa saddex sano hadaanay ka badnayn, xeerar badana waa ku ceebeysanahay, markaa waxay ku qurux badan tahay xeerba xeerkuu ka horeeyo inaan u ansixiyo, xeerkan baanka dhexe, oo ah xeerka siyaasada maaliyadeed ee lacagta dalka maamula, baananka ganacsiga iyo horumarka maamula, umada waxeedana inaan la dhicin ilaaliya weeye, Xeerarka kale ee baananka islaamiga ah, iyo baanaka ganacsiga aan raacino oo aan ansixino ayaan qabaa anigu.

    ***Waxaan soo jeedinayaa:-***
    - Xeerkaa waxba yaynaan ku daaline, xeerkaasi manta yaanu inala dhaafin oo aynu ansixino.

13. **Md. Maxamud Jamac Cilmi "Dable:-** shir-gudoonka iyo mudayaashuba wey salaaman yihiin, cadaaladu aasaaskeedu waa islaamka inagu waxaynu u soo qaadanay saldhigii dastuurka islaamka, waxaa ku qoran dastuurka Qodobkiis------, in muwaadinka la ilaaliyo maalkiisa, naftiisa iyo Hantidiisa ayaa ku taala, waxaa jira hay'ado maaliyo oo badan magaalada, baanka dhexe markaa saldhigiisa cadaalada islaamka ku fariisino, waxaa muhiima in Qodobkaa dastuurka lagu daro oo central bank waa inuu damaanad inuu ka hayo Hay'daha Maaliyadeed ee jira, oo aanay noqon qaar lagu ka tago, oo aan la odhan Qaranbaa kacdey, waa in la helaa wax damaanad qaada dadkii in waxoodii loo celiyo.

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha waaxda Hadal QoraalkaG/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| **---------------------------------------------------** | **---------------------------------------------------** |